

Guddiga Maamul Wanaagga Maaliyadda: Hadalqoraalka kulanka oo kooban

Kulanka 60aad ee 4ta Juunyo 2023 – Wasaaradda Maaliyadda

Arrimaha Batroolka iyo Gaaska: Xubnaha Guddiga Maamul Wanaaga Maaliyadda (Guddiga) iyo Wasiirka Batroolka iyo Macdanta ayaa ka wada hadlay arrimaha lagu xusay qoraalka talo bixinta ee Guddiga ee ku saabsan arrimaha hortabinta leh ee dib u gorgortanka heshiiska Wax Soo Saar Wadaaga ee Coastaline. Dhinacyada ayaa isku dhaafsaday aragtiyo la xiriira fahamkooda iyo sida ay u fasirteen arrimaha lagu xusay qoraalka talo bixinta. Waxaa la dooday oo la is tusaaleeyay is-waafaqsanaan la'aanta meelaha qaar ee heshiiska wax soo saar wadaaga ee Coastaline iyo sharciyada Soomaaliya ee dhaqan galay oo ay ku jiraan Sharciga Batroolka 2020, Sharciga Maareynta Maaliyadda Dadweynaha ee 2019, iyo Sharciga Canshuuraha Dakhliga Kheyraadka La Qoto iyo sidoo kale Tusaha Wax Soo Saar Wadaaga.

Dib-u-habaynta Maaliyadda iyo Miisaaniyadda: Guddiga waxaa uu soo dhaweeyay Digreetada Ra'iisul Wasaaraha ee lagu xoojinayo maamul wanaaga maaliyadda oo uu dhawaan soo saaray waxuuna carrabka ku adkeeyay saamaynta togan ee ay ku yeelan karto hannaanka qandaraas bixinta ee dawladda iyo hannaanka hufnaanta. Kulanka ayaa sidoo kale soo dhoweeyay soo jeedinta in la soo saaro wareegtooyin lagu taageerayo digreetadaasi. Sidoo kale, waxay xubnuhu ka doodeen baahida loo qabo in la dhiso guddiga qandaraasyada ee soo iibsiga waxayaabaha qiimaha badan si waafaqsan ku dhaqanka sharciga iibka. Guddiga waxuu aqbalay codsiga Dowladda Federaalka ee ka talo siinta istiraatiijiyada iyo khibarada si tartan furan loogu galo adeegyada korontada iyo adeegyada kale ee dowladda.

Bangiga Dhexe iyo Arimaha Dhaqaalaha: Qoraalka Talo-bixinta Guddiga ee ku saabsan dib-u-habaynta Bangiga Dhexe iyo Maaliyadda ayaa lagu soo bandhigay kulanka. Qoraalku wuxuu muujinayaa horumarka laga sameeyay maamulka Bangiga Dhexe iyo dib u habeynta waaxda maaliyadda tobankii sano ee la soo dhaafay iyo hortabinada dib u habeynta ee sanadaha soo socda, si loo sii amba qaado guulaha la gaaray ilaa hadda. Kulanka ayaa lagu soo qaaday soo celinta ku dhawaad 7 milyan oo doolarka Maraykanka ah oo laga helay Bankiga Intesa Sanpaolo

taasoo qayb ka ah dadaallada Bankiga Dhexe iyo Dowladda Federaalka ee dib u soo celinta hantida qaranka ee dibadda lagu haysto.

Heshiiyada iyo Qandaraasyada Guud: Guddiga waxuu ka hadlay halka ay marayaan tiro heshiisyo iyo qandaraasyo ah oo ay ku jiraan hubinta tayada waxyaabaha la dhoofiyo iyo ururinta deynta maqan ee duulista hawada. Kulanka ayaa lagu sheegay in loo baahan yahay in dhammaan hindise-sharciyeedyada ay raacaan nidaamka ku xusan qeybta heshiisyada ee sharciga iibka.